



MILWAUKEE
PUBLIC SCHOOLS

FICILADA/TALLAABOYINKA XAALADAHA DEGDEGGA

mpsmke.com/safety



JOOGSO! Iska joog qolkaaga ama aaggaaga. Baneey hoolalka.

ARDAYDA

- ▶ Baneey hoolalka.
- ▶ Gal qol.
- ▶ Meeshaas iska joog ilaa lagu dhawaaqo inay WAX WALBA HAGAAGSAN YIHIIN (ALL CLEAR).
- ▶ Sii wad waxqabadyada caadiga ah.

DADKA WAAWEYN

- ▶ Xir oo quful saar qolka.
- ▶ Xisaabi ardayda iyo dadka waaweyn.
- ▶ Sii wad waxqabadyada caadiga ah.



SUGI! Gal gudaha. Xir albaabada bannaanka ah.

ARDAYDA

- ▶ Gal gudaha dhismaha.
- ▶ Sii wad waxqabadyada caadiga ah.

DADKA WAAWEYN

- ▶ Kuwa kale soo geli gudaha oo xir albaabada gudaha ah.
- ▶ Ka digtoonaaw waxyaabaha khatarta ah.
- ▶ U diyaargarow inaad jawaab-celin samayso.
- ▶ Xisaabi ardayda iyo dadka waaweyn.
- ▶ Sii wad waxqabadyada caadiga ah.



XIRITAANKA DHISMAHA/GO'DOOMIN! Qufulada, nalalka, meel qarsoon.

ARDAYDA

- ▶ Ka fogow meelaha lagaa arki karo.
- ▶ Aamus.
- ▶ Ha furin albaabka.

DADKA WAAWEYN

- ▶ Ardayda ka soo kaxeey hoolalka oo geli qolka.
- ▶ Quful saar albaabka. Dami nalalka.
- ▶ Ka fogow meelaha lagaa arki karo oo aamus.
- ▶ Ha furin albaabka.
- ▶ U diyaargarow inaad ka baxdo dhismaha ama aad is-difaacdo.



QAXA/DHISMAHA KA BAXA! Dhagaysiga warbixinada goobaha.

ARDAYDA

- ▶ Iskaga tag alaabtaada haddii loo baahdo.
- ▶ Qaado taleefanka haddii ay suurtagal tahay.
- ▶ Raac tilmaamaha.

DADKA WAAWEYN

- ▶ Ku hogaami ardayda goobta daad-guraynta.
- ▶ Xisaabi ardayda iyo dadka waaweyn.
- ▶ Ogeysii xafiiska ardayda iyo dadka waaweyn ee maqan, dheeraadka ah ama dhaawacan.



GABAAD! Raac xeeladda ka badbaadista khatarta.

ARDAYDA

- ▶ Raac tilmaamaha ka badbaadista halista.
- ▶ **Duufaan:** Aad aagga gabaadka.
- ▶ **Hazmat:** Ka carar/ka fogow khatarta.

DADKA WAAWEYN

- ▶ Hel tilmaamaha looga badbaadayo nooca khatarta markaas jirta.
- ▶ Xisaabi ardayda iyo dadka waaweyn.
- ▶ Haddii ay tahay Hazmat, xir qolka.
- ▶ Ogeysii xafiiska ardayda iyo dadka waaweyn ee maqan, dheeraadka ah ama dhaawacan.